

# Ka dhaafida Medicaid ee Oregon

## Waa maxay ka dhaafida Medicaid?

Gobolka waa inuu codsadaa Medicaid **ka dhaafitaankeeda** markii uu rabo inuu isbedel ku sameeyo habraacyada caadiga ah. Gobolka wuxuu ka codsan karaa dawlada federaalka ka dhaafitaankan. Gobolka waxa uu codsan karaa in laga dhaafto xeerarka qaarkood si loo helo dabacsanaan weyn oo ku saabsan kuwa soo socda iyo in ka badan:

- Yaa u qalma Medicaid
- Waa maxay faa'iidooyinka ay helayaan
- Sidee ayaa daryeelka caafimaadka loo gaarsiiyo xubnaha Medicaid

Oregon waxa ay codsan doontaa ka dhaafitaan cusub ee sanadaha 2022 ilaa 2027. Sii loo sii wado baddelka barnaamijka Medicaid ee Oregon, Sidoo kale loo yaqaano Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa sameeyay hiigsi, hadafyo, xeelado iyo codsi.

## Ka dhaafitaanadii hore ee Oregon

Dawladda federaalka ayaa badanaa waxaa ay keliya ansixisaa ka dhaafitaanada sanado yar markiiba. Ka dhaafitaanka Medicaid ee Oregon waxaa dib loo cusboonaysiiyay oona la kordhiyay marar badan tan iyo 1994:

- Ka dhaafistii asalka ahayd ee 1994 oo ay aasaastay OHP. Ka dhaafitaankani waxaa ay balaarisay u qalmitaanka iyo Dheefaha.
- Dib u cusboonaysiinta ka dhaafitaanka ee 2012 ee ay aasaaseen ururada daryeelka is waafaqsan (CCOs). CCOs waa ururo maxali ah oo bixiya wax ku saabsan daryeelka caafimaadka.
- Dib u cusbooneysiinta ka dhaafitaanka 2017 oo lagu dhisay loona hagaajiyay qaabka CCO.

## Waxaan rajeynayaa

Ka dhaafida 2022-2027 waxay raadin doonan in lagu dhiso Oregon sooyaalkeeda adag ee hal abuurka daryeelka caafimaadka iyo horumarka ay xagiisa ka samayneyso:

- Abuuritaanka nidaam daryeel caafimaad oo sinnaan badan, dhaqan iyo luqad ahaanba jawaab leh
- Caawimaada uu ku jiro kharash iyadoo la siinayo daryeel caafimaad oo tayo leh
- Maalgashiga daryeelka caafimaad ee ku habboon sinaanta iyo dhaqan ahaantaba, iyo
- Xaqiijinta in qof walba uu heli karo caymiska ay u baahanyihiin.

## Waa maxay Medicaid?

**Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) waa barnaamijka Medicaid ee Oregon.**

Medicaid waa barnaamij federaali ah oo uu maareeyo gobol kasta. Dawladda federaalka waxay ka caawisaa inay bixiso kharashka barnaamijka.

Sharciga Federaalka:

- Wuxuu dejiya halbeeyo ku saabsan sida barnaamijku u shaqeeyo.
- Wuxuu dejiya halbeegyada ugu hooseeya ee ku saabsan u qalmitaanka Medicaid.
- Wuxuu dejiya faa'iidooyinka loo baahanyahay.

Oregon gudaheeda, Medicaid, oo loo yaqaano Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP), waxaa ay bixisaa caymiska caafimaadka qiyaastii afartii qofba mid kuwaas oo ku nool Oregon dhammaan qaybaha kala duwan ee noloshu.

## **Waxaan dooneynaa inaan adiga kaa maqalno!**

Barnaamij dadweyne ahaan, OHP waxaa iskaleh dhammaanteena. OHA waxay u baahantahay fikradaada si ay u xaqiijiso in hiigsiga ku aadan dib u cusboonaysiinta ka dhaafitaanka ay ka tarjumayso baahiyaha bulshada. Waanu soo dhawaynaynaa fikradaada ku saabsan sidii OHP looga dhigi lahaa mid waxtar u leh qof kasta oo gobolkeena jooga. Fadlan maskaxda ku hay, si kastaba ha noqotee, inay jiraan xaddido ka dhan ah noocyada isbadelada OHA ay soo jeedin karto.

OHA waxay raadinaysaa fikrada dadweynaha ee ku saabsan codsigeena dib u cusboonaysiinta ka dhaafitaanka.

**Dadweynaha waxaa lagu casuumay inay ra'yi ka dhiibtaan qabyo qoraalka codsiga ka dhaafitaanka Diseembar 7, 2021 illaa Janaayo. 7, 2022. Faahfaahinada ku saabsan shirarka iyo sida looga faalooda halkan hoose ayay yaalaan.**

## **Fursadaha ku aadan faalooyinka dadweynaha ee codsiga dib u cusboonaysiinta ka dhaafitaanka Medicaid ee Oregon**

- **Guddiga Xeerka Caafimaadka Oregon**

Diseembar 7, 2021 | 8:30 subaxnimo – 12 galabnimo

Kusoo biir kulanka: <https://www.zoomgov.com/j/1602657497?pwd=emhzUnJsK1EzWk5rV0VpYUdjU3VrQT09>

Hal taabasho moobeel:+16692545252,,1602657497#,,,,,0#,,306554#

- **Guddiga Sinaanta Caafimaadka**

Diseembar 9, 2021 | 12 duhurnimo – 2 duhurnimo

Kulanka Kooxaha Microsoft [Guji halkan si aad ugu biirto kulanka](#)

Ama wac (maqal kaliya) +1 971-277-2343,,928637902#

Aqoonsiga Shirka Taleefoonka: 928 637 902#

- **Kulanka Iskaashatada Bulshada (en español)**

Diseembar 9, 2021 | 3:30 galabnimo – 5:30 galabnimo

Kusoo biir kulanka: <https://us02web.zoom.us/meeting/register/tZwkde6uqTsuGtE7CbrxDUI4WLOf70l18wg5>

- **Guddiga La-talinta Medicaid**

Diseembar 15, 2021 | 9 subaxnimo — 12 duhurnimo

Kulanka Kooxaha Microsoft [Guji halkan si aad ugu biirto kulanka](#)

Ama wac (maqal kaliya) +1 971-277-2343,243372877#

Aqoonsiga Shirka Taleefoonka: 243 372 877#

- **Dajinta mustaqbalka OHP – Aqoon isweedaarsiga 3aad.**

Diseembar 16, 2021 | 5:30 galabnimo – 7:30 galabnimo

Horay iskaga diwaangeli shirkan: [https://www.zoomgov.com/meeting/register/vJlsc--spjoqHteaw5dXCTUmWwDVE\\_7NgDU](https://www.zoomgov.com/meeting/register/vJlsc--spjoqHteaw5dXCTUmWwDVE_7NgDU)

- **Kulanka Iskaashatada Bulshada**

Diseembar 17, 2021 | 10:30 subaxnimo – 12:30 galabnimo

Kusoo biir kulanka: <https://us02web.zoom.us/meeting/register/tZcod-6trD8sEtHdQadl0abTNykZVpihdfFJ>

- **Guddiga Xeerka Caafimaadka Oregon**

Janaayo 4, 2022 | 8:30 subaxnimo – 12 duhurnimo

Kusoo Biir Kulanka ZoomGov <https://www.zoomgov.com/j/1609166382?pwd=Ulp0eis5bUZPeUNQdWM3VU9aMnZwQT09>

Aqoonsiga Kulanka: 160 916 6382 lambarka sirta ah: 912812

Hal taabasho moobayl +16692545252,,1609166382# ,, 0#,,912812# US (San Jose)

## **Haddii aadan awoodin inaad soo xaadirto kulanka, waxaad ku soo diri kartaa iimayl faallooyinkaaga**

[1115Waiver.Renewal@dhsosha.state.or.us](mailto:1115Waiver.Renewal@dhsosha.state.or.us).

## **Waxaad sidoo kale boostada ugu soo diri kartaa faallo qoraal ah**

Xeerka Caafimaadka iyo Falanqeynta Kooxda Dib u Cusbooneysiinta Ka dhaafitaanka Medicaid  
Fiira gaar ah: Michelle Hatfield  
500 Summer St. NE, 5th Floor, E65  
Salem, OR 97301

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Barnaamijka Wacyigelinta Iskaashatada Bulshada (Community Partner Outreach Program) [community.outreach@dhsosha.state.or.us](mailto:community.outreach@dhsosha.state.or.us) ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.